MKB

Tack
för den här tiden

KAANTAROOL OO HUBI ADIGU GURIGA

Waxaanu rabnaa in aanu kaa caawino si guuritaankaagu u noqdo mid fudud oo fiican sida ugu macquulsan. Si aad u guurto.

Waa muhiim inaad si taxaddir leh u dhex marto guriga inta aanad noo keenin furayaasha annaga.

Nadiifi oo iskaantarool adigu

Isticmaal liiska hubinta ee warqadda gadaasheeda ku yaala si aad u fahamto waxa loo baahan yahay in la nadiifiyo oo la hagaajiyo.

Inaad ka fikirto!

U soo sheeg adeegga wixii aan shaqaynayn/meesha xumaata wakhti fiican..

si fudud ayaad taas ugu samayn kartaa appka guryaha ama adiga oo ka geleya mina sidor bogga mkbfastighet.se

Filim ku tilmaamaya.
talooyin wanaagsan marka aad nadiifinayso

Marka aad guriga faaruqiso ee aad nadiifiso, adiga ayaa iskaa u kaantaroolaya adiga oo calaamad saaraya meelaha aad dhamaystirtay.

Liiska hubinta ayaa markaa loo isticmaali doonaa aasaas ahaan (underlag) marka aannu kaantaroolayno guriga.

Keenida furaha

Waxaa lagula soo xiriiri doonaa isla bisha aad guurayso, si aynu u go'aansano wakhti aad noo keenayso furayaasha annaga. Waxaad ku ridaysaa furayaasha iyo liiska hubinta ee saxiixan baqshadda furayaasha ee aad annaga naga heshay. Waxaad baqshadda u geynaysaa xafiiska xaafadaada ku yaala wakhtiga lagu heshiiyay.

Maxaa dhacaya kadib?

Waxaanu hubin doonaa in aannu helnay furayaasha iyo taagyada albaabada lagu furo (taggar) dhammaantood oo waxaanu had iyo jeer kaantarooli doonaa gurigaaga muddo 24 saacadood gudahooda ah, maalmaha la dhaqaynayo ee aanay ku jirin fasaxyadu, laga bilaabo marka aannu helo furayaasha. Waxaanu qiimayn doonaa nadaafadda, xaaladda iyo khaladaadka iyo waxyeelooyinka, oo waxaanu qori donaa wax kasta oo aan sax ahayn. Waa muhiim inaad wareejiso guri dhamaystiran oo nadiif ah, haddii tusaale ahaan aanad si fiican u nadiifin waxaanu shaqaalayn doonaa shirkad wax nadiifisa adiga ayaana bixinaya wixii kharash ah. Haddii loo baahdo, adiga ayaa bixin doona kharashka. Waxaanu qori doonaa wax kasta oo aanu u aragno in aanay sax ahayn.

JIkada

- ☐ Shooladda- nadiifi dhammaan saxamada shooladda ee sare, soo jiid oo gadaal ka nadiifi, dhinacyada oo dhan iyo shooladda hoosteeda
- ☐ **Foornada-**nadiifi gudaha iyo dibadda. Biraha shabaga ah saxamada wax lagu dubo waa inay nadiif noqdaan, nalku waa inuu shaqaynayo. meelaha foornada iyo shooladu waa inay nadiif noqdaan, dhaladana/muraayda waa in la safeeyo
- ☐ **Firinjeerka-** nadiifi gudaha iyo dibadda. Xarigga caagga ah waa la nadiifinayaa. Nadiifi xagga dambe iyo hoostaba. Sanduuqyadu waa inay dhan yihiin.
- ☐ **Qaboojiyaha (frys)-** barafka laga dhalaaliyo oo la nadiifiyo gudaha- iyo dibaddaba. Nadiifi xagga dambe iyo hoostaba. Sanduuqyadu waa inay dhan yihiin.
- ☐ **Marawaxada shoolada-** filterka marawaxadu waa inuu nadiif yahay oo aanu lahayn wax dufan ah. Marawaxada shoolada korkeedu waa inuu nadiif yahay.
- ☐ **Meelaha lagu shaqeeyo –** waa inay nadiif yihiin oo aanay lahayn wax nuurad ah (meesha waalka la saaro/kursiga shaqada, tuubada, meesha waalka lagu dhaqo)
- ☐ **Armaajooyinka dhammaantood iyo khaanadaha xawaashka –** nadiifi gudaha iyo korkooda/dibadda Meesha gacmaha lagu qabto waa inay nadiif tahay
- ☐ **Marmarka iyo derbiyadu –** waa inay nadiif noqdaan
- ☐ **Makiinada weelka-** waa in la nadiifiyo gudaha iyo dibaddaba
- ☐ Wax kasta oo jikada yaalaa waa inay u shaqeeyaan sidii loogu talagalay

Waxyaabaha kale

- ☐ Nalalku dhammaantood waa inay shaqaynayaan
- ☐ Qolka istoorku waa inuu faaruq yahay oo la nadiifiyey
- ☐ Furayaashii lagu siiyey markii aad soo degtay guriga waa in aad dhammaantood haysaa
- ☐ Balakoonka iyo barxadda bannaanku waa in la faaruqiyey, la nadiifiyey oo wixii caws qashin ah laga gooyey
- ☐ Dhammaan wixii cilladaha ah ee guriga ka khaldanaa waa in hore loo hagaajiyey ama la wargeliyey cidii ay khuseysay
- ☐ Korontada gurigu waa inay daaran tahay/shidan tahay
- ☐ Firinjeerka/qaboojiyuhu waa inay shaqaynayaan
- ☐ Sanduuqa boostada / meesha boostadu waa inay faaruq tahay
- ☐ Albaabbada iyo dariishadaha dhammaantoo way inay xiran yihiin iyo oo la qufulo

Qolka musqusha

- ☐ Saxanka qobaysku waa inuu nadiif noqdo oo aanu lahayn wax nuurad ah (kalk)
- ☐ Musqusha lagu fariistaa – waa inay nadiif noqoto, gudaha, korka, hoos iyo dhammaan agagaarkeeda
- ☐ Shebega ceelka dhulka ku yaala ayaa kor loo qaadayaa oo waa in ceelka gudaha laga nadiifiyaa
- ☐ Muraayadaha – waa in la tirtiro oo aanay lahayn wax nuurad ah (kalk)
- ☐ Armaajada musqusha/khaanadaha waa in la tirtiraa oo la nadiifiyaa
- ☐ Meesha warqadda musqusha la geliyo, meesha shukumaanka/tuwaalka lagu qalajiyo, iyo meesha wax kululaysa (element) – waa in la nadiifiyaa
- ☐ Nalalku- way inay shaqeeyaan oo la tirtiraa
- ☐ Albaababda musqulah - waa la tirtiray oo aanay wax wasakh ah lahayn
- ☐ Darbiyada, dhulka iyo alwaaxyada/looxyada yaryar ee ku yaala dhulka (lister) – waa in aanay lahayn wax nuurad ah (kalk), boor/boodh iyo wasakh

Qolalka dhammaantood

Qolalku dhammaantood meelahan soo socdaa waa inay nadiif ahaadaan, la tirtiraa, oo burusha lagu nadiifiyaa oo aanay lahayn wax wasakh ah

- ☐ Darbiyada
- ☐ alwaaxyada/looxyada yaryar ee ku yaala dhulka (lister)
- ☐ Dhulka
- ☐ Kulayliyeyaasha (element), xitaa gadaashooda/xagga dambe
- ☐ Fareemyada sare ee ku wareegsan dariishadaha/daaqadaha (fönsterkarmar)
- ☐ Meelah korantada la geliyo iyo meelaha nalalaka laga daaro/laga demiyo
- ☐ Albaabada iyo meelaha la qabto marka la furayo/la xirayo oo ay ku jiraan fareemada ku wareegsan albaabada iyo albaabada korkooda sare
- ☐ Shabagyada dariishadaha/daaqadaha lagu xiro ama lagu daboolo (persienner)
- ☐ Qolalka dharka iyo Armaajooyinka, gudaha iyo xagga sare
- ☐ Dariishadaha/daaqadaha waa la tirtirayaa gudaha, dibaddaba iyo muraayadaha dhexdooda

Underskrift

Namnförtydligande (texta)